Park Nicollet
HealthPartners

# Siyaasadda Qaansheeg Dirista iyo Lacag Ururinta

*Billing and Collections Policy—Somali*

Ujeedada Siyaasaddan Qaansheeg Dirista iyo Lacag Ururintu waa in la sharxo qaabka Adeegyada Caafimaadka Park Nicollet ee helista lacagta daryeelka la siiyey bukaanada. Haddii ay dhacdo inaan lacag la bixin Park Nicollet Health Services (halkan kadib "Park Nicollet," kaasi oo ay kujiraan Methodist Hospital, TRIA Orthopaedic Center iyo Park Nicollet Clinics) waxa ka go'an samaynta dadaal macquul ah si ay u go'aamiso haddii bukaan uu mutaystay kaalmada dhaqaale kahor bilaabista tallaabooyinka lacag ururinta. Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka Park Nicollet waxay awood u leedahay oo masuuliyadna ka saaran tahay go'aaminta haddii Park Nicollet ay samaysay dadaallo macquul ah si ay u go'aamiso haddii qofi uu mutaystay kaalmada dhaqaale iyo haddii Park Nicollet loo oggol yahay inay ku dhaqaaqdo tallaabooyin lacag ururin oo gaar ah oo lagu sheegay Siyaasaddan Qaansheeg Dirista iyo Lacag Ururinta.

## TALLAABOOYINKA PARK NICOLLET AY QAADI KARTO SI AY U HESHO LACAGTA

Park Nicollet waxay ku dhaqaaqi kartaa hawlo lacag ururin si ay u hesho lacagta daryeelka. Hawlaha lacag ururinta qaarkood waa ka muhiimsan yihiin kuwa kale waxayna u baahan yihiin ogaysiis gaar ah oo qoran oo ku socda bukaanada, sida ku cad Siyaasaddan. Hase yeeshee, Park Nicollet loogama baahna inay siiso ogaysiis qoran bukaanada marka ay ku dhaqaaqayso hawlaha lacag ururinta ee aan muhiimka ahayn.

Park Nicollet **loogama** baahna inay siiso ogaysiis bukaanada kahor intayna ku dhaqaaqin hawlaha lacag ururinta ee soo socda:

- Dirista bayaanada qaansheegaha bukaanada ee ay kujiraan kuwa taagan iyo kuwa muddo dhaafay
- Isku dayidda ka xaajoodka bixinta lacagta la leeyahay
- U wareejinta xisaabta bukaanka hay'ad daynta ururisa ama shirkad sharci
- Dirista waraaqo ama samaynta wicitaano, laga samaynayo Park Nicollet , hay'adaha lacag ururinta Park Nicollet, ama hay'adaha kale ee Park Nicollet

Park Nicollet **waxa** laga rabaa inay siiso ogaysiis bukaanada kahor intayna ku dhaqaaqin tallaabooyinka gaarka ah ee ururinta lacagta ee soo socda (sidoo kale loo yaqaan "Tallaabooyinka Lacag Ururinta Qayru-caadiga ah" sharciga fadaraalka marka la eego):

- Ka gadista daynta bukaanada hay'ad lacag ururin ama shirkad sharci
- Bilaabista dacwad sharci ah, Park Nicollet ama hay'ad Park Nicollet, taasi oo ay kujiri karaan
    - Maxkamadda sheegashooyinka yaryar/heshiinta
    - Gadista hantida ma-guurtada ah
    - La wareegista xisaabta bangiga ama hantida kale ee qof ahaaneed
    - Ka goynta mushaharka
- Diidmada, dib-u-dhigga, ama u baahnaanta lacagta in la bixiyo kahor intaan la bixin daryeela mustaqbalka (Park Nicollet waligeed diidi mayso daryeelka gurmadka lacagta oon la siin darteed daryeel hore oo Park Nicollet waxay ku dhaqmi doontaa dhammaan shuruudaha Xeerka Daawaynta Caafimaad ee Gurmadka iyo Shaqaalaha [EMTALA])

Park Nicollet wax dulqaar ah uma laha hadalka ama dhaqanka gabboodfalka, dhibaataynta, dulmiga, beenta, khayaanada ama marin-habaabinta ah ee ay ku kacaan qareenkeeda ama hay'adaha daynta soo ururiya, oo shaqaalaha Park Nicollet–na iyagaa k masuul ah ka soo ururinta daynta caafimaad bukaanada.

Park Nicollet iyo qareenadeeda iyo hay'adaha dayn ururintu u sheegi maayaan bukaanada dambiga ka gala xafiisyada dayn qaadashada.



21645 (1/2017)

**DEDAALADA GO'AAMINTA MUTAYSIGA KAALMO DHAQAALE**

**Dalabyada iyo Wargelinaha:**
Park Nicollet waxay aqbali doontaa oo ka shaqayn dalabyada kaalmada dhaqaale laga bilaabo taariikhda daryeelka la siiyey bukaanka waxayna leedahay xaqa inay joojiso aqbalaadda dalabyada **240 maalmood** kadib bayaanka qaansheeg dirista cusbitaal ka saarista koowaad. Park Nicollet waxay qaadi doontaa tallaaboyin si ay u ogaysiiyo bukaanada Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee Park Nicollet kuna dhaqaaqi mayso tallaabooyinka lacag ururin oo gaarka ah (sidoo kale loo yaqaan "tallaabooyinka lacag ururin ee qayru-caadiga ah") ugu yaraan **120 maalmood** laga bilaabo taariikhda bayaanka qaansheeg dirista cusbitaal ka saarista koowaad ee bukaanka. Haddii xisaabta bukaanku ku lug leedahay dhacdooyin daryeel oo badan, Park Nicollet ku dhaqaaqi mayso tallaabooyinka lacag ururin ugu yaraan **120 maalmood** laga bilaabo bayaanka qaansheeg dirista cusbitaal ka saarista koowaad ee dhacdooyinka daryeel ee ugu dambeeyey.

Ugu yaraan **30 maalmood** kahor Park Nicollet intayna qaadin tallaabooyinka lacag ururin oo gaar ah lacagta la bixin waayo, Park Nicollet waxay samayn waxa soo socda:

- Siiso ogaysiis qoran (sida badan warqad loo diro cinwaanka bukaanka lagu ogaa) oo u sheegaya bukaanka in:
  - Kaalmada dhaqaale ay heli karaan dadka mutaystay
  - Park Nicollet ay qaadi karto tallaabooyinka lacag ururin oo cayiman si ay lacagta u hesho
  - Park Nicollet ay bilaabi karto tallaabooyinka lacag ururin oo cayiman 30 maalmood kadib taariikhda warqadda ogaysiiska
- Soo raaciso guudmar luuqad fudud ku qoran ee Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee Park Nicollet warqadda ogaysiiska
- Isku-dayi inay kula xidhiidho bukaanka taleefan (ama ay la kulantoba haddii ay suurogal tahay) si ay afka uga ogaysiiso bukaanka Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee Park Nicollet iyo sida bukaanku ugu heli karo kaalmada habka dalabka

Haddii Park Nicollet go'aansato dib-u-dhigto ama diiddo daryeel lacagta oo la bixin waayo darteed daryeelka kahor, Park Nicollet waxay samayn waxa soo socda:

- Waxay siin bukaanka ogaysiis qoran oo ay ka mid yihiin
  - Foomka dalabka Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale
  - Bayaan in kaalmada dhaqaale ay heli karaan dadka mutaystay iyo wakhti kama dambays ah oo Park Nicollet ayna aqbalayn dalabyada kaalmada dhaqaale ee bukaanka daryeelka kahor
- Ka shaqayso, qaab la dedejiyey, wixii dalab kaalmada dhaqaale ee bukaanka laga qabtay kahor wakhtiga kama dambaysta ah

**Dalabyada Aan Dhammaystirnayn:**
Haddii Park Nicollet ay hesho dalab kaalmo dhaqaale oo aan dhammaystirnayn ama kala-dhiman, Park Nicollet waxay samayn waxa soo socda:

- Waxay hakin wixii tallaabooyinka lacag ururin oo qayru-caadi ah
- Waxay siin bukaanka warqad ogaysiis oo sharxaysa macluumaadka ama dokumentiga dheeraadka ah ee ay tahay khasab in la gudbiyo kahor dalabka intaan laga shaqayn iyo sida loola xidhiidho Park Nicollet si sidaas loo yeelo
- Haddii bukaan ku dhammaystiro dalab kaalmada dhaqaale muddada dalabka Park Nicollet , Park Nicollet si dhakhso ayey go'aan uga gaadhi sida ku cad qaybta hoose ee Dalabyada Dhammaystiran

**Dalabka Dhammaystiran:**
Haddii Park Nicollet ay hesho dalab dhammaystiran ee kaalmada dhaqaale inta lagu jiro muddada dalabka Park Nicollet , Park Nicollet waxay samayn waxa soo socda wakhtiga loogu talogalay:

- Waxay hakin wixii tallaabooyinka lacag ururin oo qayru-caadi ah
- Waxay go’aan ka gaadhi mutaysiga kaalmada dhaqaale iyo aasaaska go’aaminta
- Haddii Park Nicollet go’aamiso in bukaan uu mutaystay kaalmada dhaqaale, oo adeegyadana laga helayey Methodist Hospital, Park Nicollet waxay samayn waxa soo socda:
    - Haddii bukaanku mutaystay daryeel qiime-dhimis leh (maya bilaash), Park Nicollet waxay siin doontaa bukaanka bayaan qaansheeg oo muujinaya sida lacagta loo go’aamiyey iyo macluumaad la xidhiidha xisaabinta kaalmada dhaqaale ee Park Nicollet
    - Waxay u celin wixii lacag bukaanku uu ka bixiyey daryeelka Methodist Hospital ee ka badan xaddiga bukaanka la go’aamiyo inuu qof ahaan ka masuul yahay
    - Waxay qaadi dhammaan tallaabooyinka macquulka ah si ay u beddesho wixii tallaabooyin lacag ururin ee ay dhici karto in loo bilaabay si ka dhan ah bukaanka

**Go’aaminaha Mutaysiga Ma-awaalka:**
Park Nicollet waxay samayn kartaa go’aamino mutaysi oo mala-awaal ah kaalmada dhaqaale. Tani waxay ka dhigan tahay in Park Nicollet ay go’aamin karto in bukaan uu mutaystay kaalmada dhaqaale iyada oo la eegayo macluumaad Park Nicollet ay hore u haysay, iyada oon si toos ah uga helayn macluumaad dheeraad ah bukaanka. Go’aaminta mala-awaalka ah waxay kusalaysnaan kartaa macluumaad Park Nicollet ay hayso ama mar dambe ay heshay. Marka Park Nicollet si mala ah u go’aamiso bukaan uu mutaystay kaalmada dhaqaale, laakiin uu mutaystay wax kayar kaalmada ugu badan, Park Nicollet waxay samayn waxa soo socda:

- Waxay ogaysiin bukaanka go’aanka waxayna ku wargelin bukaanka wax kusaabsan sida loo dalbado kaalmo dhaqaale oo badan
- Waxay siin bukaanka wakhti macquul ah si uu u dalbado kaalmo badan
- Waxay ka shaqayn dalab dhammaystiran ee kaalmada badan sida sare ku cad Siyaasaddan Qaansheegta iyo Lacag Ururinta

**HAY’ADAHA URURIYA LACAGTA DAYNTA AH**
Habka lacag ururintu wuxuu keeni karaa u gudbinta xisaabta bukaanka hay’ad ururisa lacagta daynta ah.

Park Nicollet waxay samayn waxa soo socda si ay ula socoto xidhiidhada ay la leedahay hay’adaha ururiya lacagta daynta ah dhammaantood:

- Waxay joogtayn heshiis qoran oo ay la samayso hay'ad kasta oo kuwa daynta ururiya ah taasi oo ay u adeegsanayso inay bukaanka daynta ka soo qaaddo.Heshiisku wuxuu uga baahan doonaa hay’adda daynta soo ururinaysa inay ku dhaqanto shuruudaha heshiiska, shuruucda khuseeya, iyo Siyaasaddan.
- Siin mayso wixii hay'adda daynta soo ururiya wax gunno hawl-qabad ah, gunno sii-meel-dhigasho ah, ama wax la mid ah oo lagu xisaabiyey iyada oo lagu salaynayo boqolkiiba inta dayn ay ka soo ururisay laba ama kabadan oo bukaan. Tani kama mamnuucayso Park Nicollet inay mushqaayadda ku siiso hay'adda lacag ururinta boqolkiiba inta dayn ay ka soo qaadday bukaanka, haddii Park Nicollet ay aasaastay xakamayn heshiis oo ku filan si ay u hubiso in hay'adda lacag ururintu u dhaqanto qaab waafaqsan heshiisyada khuseeya iyo himilada Park Nicollet.
- Inay ku tabobarto hay'adaha ururiya daynta Siyaasadda Kaalamda Dhaqaale iyo sida bukaanadu ku heli karaan macluumaad dheeraad ah ama u gudbin karaan dalab kaalamda dhaqaale.
- Ku dabasho hay'adaha ururiya daynta booqashooyin aan la shaacin oo ay ku tagto xarumaha wicitaanka hay’adda oo farto hay'adaha daynta ururiya inay samaystaan diiwaano cabasho. Park Nicollet waxay dhammaystiri hanta-dhawr sannadle ah ku dhaqanka hay’adaha daynta soo ururiya heshiisyada khuseeya iyo Siyaasaddan.

- Waxay qiimayn si sannadle ah hawl-qabadka hay'adaha daynta soo ururiya, iyada oo kusalaynaysa heerka guud ee adeegga, heerarka soo kabsiga naqdiga ah, jawaabcelinta macmiilka iyo ku dhaqanka filashooyinka Siyaasaddan. CEO-ga Park Nicollet wuxuu dib-u-eegi oo uu go'aamin si sannadle ah haddii lala gali doono ama aan lala gali doonin ama la cusboonaysiin doono ama la cusboonaysiin doonin qandaraas wixii hay'ad dayn ururisa.
- Waxay adeegsan wax aan ka badnayn saddex hay'adood oo daynta ururiya.
- Waxay isticmaashaa habka Codsiga Soojeedinta marka ay eegayso isbeddel lagu sameeyo hay'adaha lacag ururinta.Talobixin loogu talogalay xulashada hay'adda waxa kujiri doono, ugu yaraan, aragti ka timi maareeyayaasha Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka, agaasimayaasha iyo CFO.
- Waxa dib-u-eegi xisaabaha bukaanka cidda ku habboon ee awoodda u leh kahor intaan loo gudbin hay'ad dayn ururineed.

**KIISKA DACWADDA DAYN URURINTA**

Park Nicollet siin mayso hay'ad dayn ururineed ama qareen wax oggolaansho guud inay dacwad sharci ka qaaddo bukaan ururinta daynta caafimaad darteed. Waxa dacwad laga gudbin maayo bukaan gaar ah si looga soo qaato daynta caafimaad ilaa uu dib-u-eego qofka habboon ee awoodda u leh.

Hay'adaha daynta ururiya iyo qareenadu si toos ula xidhiidhi maayaan bukaan la og yahya inuu qareen matalayo iyaga oo kala hadlaya ururinta daynta iyada oon ruqsad ka haysan bukaanka.

Park Nicollet waxay samayn doontaa waxa soo socda si ay ula socoto xidhiidhada ay la leedahay qareenada daynta ururiya:

- Waxay la gali qandaraas qoran qareenka ay u adeegsanayso inuu bukaanada daynta ka qaado. Qandaraasku wuxuu fari doonaa qareenka inuu ku dhaqmo xaaladaha heshiiska, shuruucda khusaysa, iyo Siyaasaddan.
- Siin mayso wixii hay'adda daynta soo ururiya wax gunno hawl-qabad ah, gunno sii-meel-dhigasho ah, ama wax la mid ah oo lagu xisaabiyey iyada oo lagu salaynayo boqolkiiba inta dayn ay ka soo ururisay laba ama kabadan oo bukaan. Tani kama mamnuucayso Park Nicollet inay mushqaayadda ku siiso hay'adda lacag ururinta boqolkiiba inta dayn ay ka soo qaadday bukaanka, haddii Park Nicollet ay aasaastay xakamayn heshiis oo ku filan si ay u hubiso in hay'adda lacag ururintu u dhaqanto qaab waafaqsan heshiisyada khuseeya iyo himilada Park Nicollet.
- Inay ku tabobarto qareenka Siyaasadda Kaalamda Dhaqaale iyo sida bukaanadu ku heli karaan macluumaad dheeraad ah ama u gudbin karaan dalab kaalamda dhaqaale.
- Waxay dhammaystiri hanta-dhawr sannadle ah ku dhaqanka hay'adaha daynta soo ururiya heshiisyada khuseeya iyo Siyaasaddan.
- Waxay qiimayn si sannadle ah hawl-qabadka qareenka, iyada oo kusalaynaysa heerka guud ee adeegga, heerarka soo kabsiga naqdiga ah, jawaabcelinta macmiilka iyo ku dhaqanka filashooyinka Siyaasaddan. CEO-ga Park Nicollet wuxuu dib-u-eegi oo uu go'aamin si sannadle ah haddii lala gali doono ama aan lala gali doonin ama la cusboonaysiin doono ama la cusboonaysiin doonin qandaraas wixii qareen ah.
- Waxa dib-u-eegi xisaabaha bukaanka cidda ku habboon ee awoodda u leh kahor intaan loo gudbin qareen.

**KA XANNIBIS**

Park Nicollet iyo hay'adaheeda daynta soo ururiyaa iyo qareenadeedu ka xannibi maayaan mushaharka ama xisaabta bangiga bukaanka ilaa go'aan ka dhan ah bukaanka lagaga helo maxkamadda dhexdeed xaddiga daynta lacagta daynta ah. Hay'adaha daynta ururiya iyo qareenada la siin maao oggolaansho guud inay sameeyaan xannibaado xisaabta bangiga ama mushaharka bukaanka. Xannibista mushaharka ama xisaabta bukaanka waa inuu dib-u-eego qofka ku habboon ee awoodda u leh kahor intaan la bilaabin.



21645 (1/2017)